# HAGAAJINTA HAB-DHAQANKA

## QAAB DHISMEEDKA

- Dulmarka Hawlaha & Diyaarinta (10- 15 daqiiqo)
- Hordhac (3-5 daqiiqo)
- Hawl & Hadal iswaydaarsi ama wada hadal (20-30daqiiqo)
- Xiritaanka (5-10 daqiiqo)

## UJEEDOOYINKA

**Dhamaadka hawshan, ka qeybgalayaasha waxay awoodi doonaan inay:**

- Aqoonsadaan hab-dhaqamada toogan iyo kuwa xun ee ku saabsan xisaabta
- Si ula kac ah u gudbiyaan dabeecaddaha ama hab-dhaqanka xisaabta toogan oo ay si maalin joogta ah kula macaamilaan carruurtooda

## WAQTI 40-60 DAQIIQO

Aqoonso dabeecadaha ama hab-dhaqanka xisaabta toogan iyo kuwa taban oo dib u milicso sida dadka qaangaaray(dadka waa-weyn) ay u tusi karaan carruurtooda dabeecadahooda xisaabta

## AALADAHA

Daabacaadda (ama xiriirika digitalka ah) ee hawlaha



**HAWLQABAD 1.6**

**Math & Numeracy Lab, University of Minnesota**

© 2025

KA BARASHADA KHALADAADKA XISAABTA

# IS DIYAARINTA

## QORAALADA QABANQAABIYAHA

### XALKA SU'AALAHA

Isticmaal hagaha jawaabta si aad u siiso waalidiinta faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan jawaabaha hawl kicinta.

### AWOODDA DHISMAHA

Hawshani waxay ku dhisan tahay cutubka **Dabeecadaha iyo Habdhaqank** laakiin uma baahna dhamaystirka cutubkaas (Cutubka 1aad, Qaybta 3aad)

### ISBEDDELKA

Isticmaal fikradahan si aad wax uga beddesho hawsha ku salaysan:

- Da'da ilmaha
- Waqti iyo agab la heli karo si loo hirgeliyo
- Taageerada waalidiinta

### TALOOYIN

**Qoraalka buluuga** ahi wuxuu tilmaamayaa in qabanqaabiyayaashu ay oran karaan (tusaale, "**Maanta waxaan dooneynaa inaan sahamino sida fikradaha qaldan ee ku saabsan xisaabta ay u saameyn karaan waalidnimadayada**"). Qoraalka caadiga ah ama joogtada ahi waa macluumaadka qabanqaabinta.



**HAWLQABAD 1.6**

**Math & Numeracy Lab, University of Minnesota**

© 2025

## HAGAAJINTA HAB-DHAQANKA
# IS DIYAARINTA



## HAGAAJINTA HAB-DHAQANKA

Hawshan, waxaad u akhrin doontaa waalidiinta dhowr qoraal ama bayaan, bayaan kastana waxay go,aansan doonaan koox ahaan haddii bayaanku uu gudbinayo dabeecad toogan, mid taban ama mid dhexdhexaad ah oo xagga xisaabta ah. Bayaannada taban ama kuwa dhexdhexaadka ah waxay soo bandhigayaan fursad dib-uhabeynta si loo gudbiyo hab-dhaqanka xisaabeed oo toogan.



**HAWLQABAD 1.6**

**Math & Numeracy Lab, University of Minnesota**

© 2025

## HAGAAJINTA HAB-DHAQANKA
# IS DIYAARINTA

## DIYAARINTA
15-20 Daqiiqo

Koobbi ka samee Bayaannada Dabeecadaha ama Hab-Dhaqabka Xisaabta. U qaybi qoraalka, ama ku muuji shaashada.

U habeyso kuraasta waalidiinta qaab u ogalaanaysa in waalidiintu arkaan shaashada ama darbiga aad ku muujin doontid Bayaannada Dabeecadaha Xisaabta

Laga bilaabo qaybta bayaanka(fiir hagaha jawaabta), ka dooro kuwa aad ka istimaali doonto hawsha, maskaxda ku hay tilmaamahan soo socda: Dooro 2-5 bayaan ama odhaah iyadoo ku xidhan wakhtiga la hayo si aad hawsha u wado. Haddii aad waqti u hayso 5 bayaan(ama odhaah), dooro 2 toogan, 2 taban, iyo 1 dhex-dhexaad ah.

- Dooro bayaan la jaan-qaadaya waaya aragnimada waalidiinta aad taageertid, iyo sidoo kale da'da carruurtooda.
- Bayaannada 3, 4, 8, iyo 11 ayaa ku habboon carruurta waa-weyn, meesha bayaannada 2, 5, 7, iyo 9 ay si fiican ula shaqeeyaan socod-baradka iyo ilmaha yar yar ee bilaabaya iskoolka xanaanada.

Dib u fiiri Hagaha Jawaabta oo ka fikir fikrado ku saabsan sida loogu beddello bayaanka taban iyo midka dhex-dhexaadka ah oo loogu beddelo hadallo gudbinaya dabeecad ama hab-dhaqan xisaabeed oo toogan. Guud ahaan:

- Bayaannada soo jeedinaya **habdhaqan xisaabeed oo toogan** ayaa laga yaabaa inay soo gudbiyaan in ay xisaabtu tahay madadaalo, soo jiidasho, ama xiiso leh; in xisaabtu ay faa'iido u leedahay xallinta dhibaatooyinka; ama in guusha xisaabta lagu gaari karo dadaal iyo mintid loogu adkeysto. Bayaannadani waxa laga yaabaa inay kor u qaadaan shucuurta wanaagsan sida sharafta, farxadda, ama qanacsanaanta, ama muujin karaa kobcinta maskaxda.
- Bayaannada soo jeedinaya **habdhaqan xisaabeed oo taban** ayaa laga yaabaa inay soo gudbiyaan in ay xisaabtu tahay mid caajis leh, xanaaq leh, niyad jab leh, aad u adag ama kaa tan badin karta. Bayaannadani waxa laga yaabaa inay kor u qaadaan fikradaha maskaxda go'an-in xisaabtu aanay u qalmin dadaalka maxaa yeelay guuldaro ayaa la filayaa.
- Bayaannada dhexdhexaadka ah waxay sheegaan xisaabta, laakiin masoo gudbiyaan habdhaqan xisaabeed oo toogan ama taban. **Bayaannada dhexdhexaadka ah waxay bixiyaan fursad** dib loogu habeeyo si loo gudbiyo habdhaqan xisaabeed oo toogan.



**HAWLQABAD 1.6**
**Math & Numeracy Lab, University of Minnesota**
© 2025

HAGAAJINTA HAB-DHAQANKA

# HAWLQABAD

## Isbarasho

5 Daqiiqo

Waalidiinta usoo bandhig hawlqabadka. "Maanta waxaan ka hadli doonaa waxyaabo ay dadku dhihi karaan oo ma turjumaysa dabeecad ama hab-dhaqan toogan ama mid taban oo xagga xisaabta ah. Marka bayaan ka turjumo dabeecadda xisaabta ee taban, waxaan u beddeli doonnaa si aan u muujinno dabeecad toogan. Qaar ka mid ah bayaannada ama odhaahyada waxay noqon doonaan dhex-dhexaad-ma soo jeedin doonaan hab-dhaqan xisaabeed oo cad si uun ama si kale-waxaana ka hadli doonaa sida loo beddelo kuwaas si loo gudbiyo hab-dhaqan toogan."



**HAWLQABAD 1.6**

**Math & Numeracy Lab, University of Minnesota**

© 2025

## HAWL IYO FALANQAYN

**Qaybta 1aad**: 20 - 30 Daqiiqo

Marka hore, soo bandhig fikradda dabeecadaha ama hab-dhaqanka xisaabta oo qeex.

"Aan furno dooddeena ama wada-hadalkeena innagoo marka hore ka hadlayna hab-dhaqanka ama dabeecaddaha. Waa maxay dabeecadu?"

Hoggaami wada-hadalka  si aad uga caawiso waalidiinta inay gaaraan faham guud oo ah in hab-dhaqanku ama dabeecaddu uu yahay dareen ku saabsan mawduuc, qof, ama fikrad. Dabeecadda ama hab-dhaqanka xisaabta waa sida uu qofku ka dareemayo xisaabta.

Marka ay waalidiintu si caadi ah u fahmaan waxa ay dabeecaddu tahay, u beddel wada-hadalka sidii loo aqoonsan lahaa loogana fiirsan lahaa. Markaad ka hadasho sida waalidiintu u muujiyaan dabeecaddahooda waxaad ku xiri kartaa dareenka iyo dabeecaddaha dhabta ah. Waxaa muhiim ah in aan xoogga saarno in aynaan mar walba ka warqabin dabeecaddaheena, laakiin sidaas oo kale waxay saameyn ku yeeshaan luuqadeena iyo ficilkeena, taas oo iyadana saameynaysa carruurteena.

Sidee u aragtaa xisaabta? Ma ka heshaa(ama ma jeceshahay) xisaabta? Ma ku wareertaa(amase ma ku niyad jabtaa)? Ma kula tahay inaad ku fiican tahay ama aad ku xun tahay?

Sidee bay dadku u muujiyaan dabeecaddooda ama hab-dhaqankooda?

# HAWLQABAD

## HAWL IYO FALANQAYN

**Qaybta 1aad**: 20 - 30 Daqiiqo

Marka xigta, mid mid u akhri bayaannada ama odhaahyada. Isla mar ahaantaana, waxa laga yaabaa inaad sidoo kale rabto inaad ku dhejiso sabuurad cad ama shaashad la wada qeybsado. Kooxda oo dhan, ha ka fakaraan waalidiintu in bayaanku ka turjumayo hab-dhaqan toogan oo ku saabsan xisaabta, hab-dhaqan taban, iyo inuu dhex-dhexaad yahay. Haddii kooxdu u muuqato inaanay hubin sida looga jawaabo ama aanay u muuqan inay ku xiran yihiin bayaanada la bixiyay, xor u noqo inaad wax ka beddesho si aad si fiican ula jaanqaado khibradaha ka qaybgalayaashaada iyo asalkooda hore.

Tixraac Hagaha Jawaabta si aad u fududayso wada-hadalka. Ka fikir inaad isticmaasho su'aalaha sida:

- Waa maxay waxa ka dhigaya bayaankan mid toogan ama mid taban?
- Shucuuro noocee ah ayaa laga yaabaa in ay dhacdadani dareensiiso waalidka?
- Waa maxay fariinta uu ka maqli karo xisaabta ilmaha dhacdadan ku jira?

Marka aad ka shaqeyso oo aad ka wada hadasho dhamaan bayaanka la xushay waalidiinta, waxaad isticmaali kartaa bayaanka dhex-dhexaadka ah iyo bayaanka taban si aad uga caawiso waalidiinta inay ka fikiraan siyaabaha dib loogu eegi karo si ay uga turjumaan dabeecadaha toogan ee xisaabta.

- Sidee waalidku uga dhigi karaa isdhexgalkan inuu muujiyo dabeecad xisaabeed oo toogan?
- Sideed u beddeli kartaa isdhexgalkan si ay u muujiso dabeecad xisaabeed oo toogan meeshii ay ka ahaan laheyd mid taban?

Weydii waalidiinta si maskixiyan ah ay uga dhiibtaan fikrado ku salaysan tusaalooyin laga soo qaatay khibradahooda.

Ma bixin kartaa tusaalooyin ku saabsan waxyaalihii adiga ama xubnaha qoyska ka tirsan aad ku dhahdeen ilmaha ama ilmaha hortiisa kuwaas oo soo jeedinaya hab-dhaqan ama dabeecad toogan ama mid taban oo xagga xisaabta ah?

Tusaale ahaan, waligaa ma tiri in aanad jeclayn xisaabta ama aadan ku fiicnayn xisaabta ilmahaaga hortiisa? Ama ma soo jeedisay inay caawimo weydiistaan aabbahood ama walaalkood maxaa yeelay wiilasha ayaa kaga fiican xisaabta?

Ma qiyaasi kartaa naftaada inaad sidan oo kale wax u dhahdid ama u tiraahdid? Maxaad ka maqashay dadka kale oo dhahaya wax soo jeedinaya dabeecad toogan ama taban oo xagga xisaabta ah?


Math & Numeracy Lab, University of Minnesota
© 2025


# HAGAAJINTA HAB-DHAQANKA
# HAWLQABAD

## HAWL IYO FALANQAYN

**Qaybta 1aad**: 20 - 30 Daqiiqo

Sii waalidiinta waqti ay si maskixiyan ah uga fikiraan faallooyinka khibradahooda, oo ay uga wada-hadlaan sida suurtagalka ah ay u saameyn karto carruurtooda.

Hawlqabadkani wuxu ka faa'iidaysanayaa wada-hadalka kooxda oo dhan si ay uga hortagto waalidiinta in ay dareemaan in bayaannadu yihiin kuwa imtixaanaya aqoontooda.



## XIRRITAANKA

**(5-10 Daqiiqo)**

Ku dar waxyaalahan muhiimka ah ee laga qaadanaayo kulanka marka aad soo xirayso wada hadalka waalidiinta. Waxaad ku sheegi kartaa si qoraal ah, ama u qeex si ku salaysan khibradaha waalidiinta.

- Dabeecadaheena xagga xisaabta waxay saameeyaan dabeecadaha carruurteena xagga xisaabta.
- Mararka qaarkood waxaan waynaa fursadaha aan ku muujin laheyn dabeecadaha toogan ee xisaabta, ama waxaa si aan ula kac aheyn u muujinaa dabeecado taban ama xun.
- Waxaan isku dayi karnaa inaan u bareerno habka aan uga warano xisaabta si aan kor ugu qaadno dabeecadaha toogan ee xagga xisaabta carruurteena

Si loo xoojiyo waxbarashada, weydii qoysaska iney kula qaybsadaan ama kula wadaagaan hal wax oo ay ka barteen xisaabta hore ee hawlqabadkan.

**HAWLQABAD 1.6**

**Math & Numeracy Lab, University of Minnesota**

© 2025

HAGAAJINTA HAB-DHAQANKA
# ISBEDDELKA

## DA'DA ILMAHA

Dooro bayaanada ku habboon waaya-araganimada waalidiinta aad taageerto, iyo sidoo kale da'da carruurtooda. Odhaahyada ama bayaannada qaar ayaa si fiican ugu habboon carruurta waa-weyn, meesha odhaahyada ama bayaannada kalena ay si fiican ula shaqeeyaan socod-baradka iyo ilmaha yar yar ee bilaabaya iskoolka xanaanada.

## WAQTIGA IYO AGABKA

Haddii aad haysato wakhti xaddidan oo aad waalidiinta kula wadaagto hawsha, tixgeli inaad xoogga saartid kaliya laba ama saddex bayaanno.

## TAAGEERADA WAALIDIINTA

Haddii waalidiinta aad la shaqeyso ay u baahan yihiin tixgelin dheeraad ah si ay uga qayb-qaataan, hubi inaad ku taageerto baahiyadooda sida:

- Usoo bandhig qoraal kooban
- Bixinta dhammaan agabka oo lagu qoray luqadda hooyo ee waalidiinta (oo leh tarjumaad marka ay khuseyso)
- waalidiinta doorbidaya inay ku hawlgalaan habab kale oo aan aheyn akhrinta agabka ama kuwa leh xirfadaha wax-akhrista oo xaddidan, dooro hal ama labo bayaan si ay dib ugu fiiriyaan si koox ahaan ah. Diyaari wada hadal kooxeed oo aan u baahneyn inay waalidiintu akhriyaan. Taa beddelkeeda waxaad kor u akhrin kartaa bayaanada, ku qeex waxa nuxurka leh sabuurada cad oo xabbad xabbad u qor, ama isticmaal meel laha dhijitalka ah sida jamboard-ka si aad ugala hadasho wax yaaba muhiimka ah ee mawduuca la aqoonsaday.



Hawlqabad 1.5

Math & Numeracy Lab,
University of Minnesota
© 2025

## HADALLAHA DABEECADAHA XISAABTA-QAYBTA 1AAD


1) Aad ayaan ugu faraxsanahay inaan wakhtigan kula qaato si aan timahaaga kuugu dabo. Waxaa jira biinan badan oo tinta la galinaayo. Waxaan heysanaa 20! Waxaan ogahay in haddii aad iska fadhiisatid inta aan timahaaga dabitaankooda ka shaqeynaayo, waxaan awoodnaa inaan dhammaantood biinanka soo gelinno. Hadda aan 10 samayno iyo 10 ka dib markaad wax yar ka nasatid fadhigan oo aadan is dhaqaajinaynin.

2) Aan tirino baloogyada aad haysatid [Waxay la tirisaa baloogyada ilmahaga]

3) Aan samayno Makaroni(Baasto) iyo Farmaajo(burcad). Tilmaanta cuntadani waxay leedahay waxaan u baahanahay ¼ koob oo subag ah, laakiin subagga waxaa lagu qiyaasaa qaado. Ma aqaani inta qaaddo ee ku jirta ¼ koob. Waxaan jeclaan lahaa beddelkeeda inay koobab kudhejiyaan baakada subaga. Aan wax kale iska sameyno.

4) Waxaan cabbirayaa alwaax si aa u gooyo albaab cusub. Way adag tahay maxaa yeelay waa inaan hubiyo in albaabku si fiican ugu habboon yahay meesha albaabka loogu tala galay, markaa waa inaan si sax ah u cabbiraa. Waxaan hubin doonaa cabbiridayda laba jeer, si aan u hubiyo inaan gooyo cabbirka saxda ah. Aaad baan ugu hanweynaan doonaa hadaan dhiso albaab sax ah.

5) (Waalid iyo ilmo oo ku ciyaaraya qaab-kala-soocidaz) Waxaad haysataa afargees leh, isku day inaad hesho meesha ay gasho. Isku day! Waan ogahay inay ku jahawareerinayso marka aanay gudaha u gelin. Isku day, in kastoo, mararka qaarkood waxay qaadanaysaa waqti in la ogaado. Maxaan sameyn karnaa si aan iskugu dayno inaan ogaano meesha uu afargeeslahani ku habboonaan doono?




Math & Numeracy Lab,
University of Minnesota
© 2025

## HAGAAJINTA HAB-DHAQANKA

# FAAHFAAHINTA WAALIDIINTA

## HADALLAHA DABEECADAHA XISAABTA-QAYBTA 2AAD

6) Ma jiro buskid ku filan qof walba, markaa aan helno wax kale oo aan cunta fudud ahaan u cuno. Ma garanayo sida loo qaybiyo si uu qof walba u helo in isku mid ah.

7) Ma aragtay intay dheerar le eg tahay munaaradda baloogyadaas? Waxaa la yaabanahay inta baloog ee ay leedahay? Waxay u egtahay inay yihiin kuwa badan!

8) Waxaa rabaa inaan duubo sanduuqan, laakiin ma aqaano in ay warqadda duuban ay ku filan tahay iyo in kale. Beddelkaada, bac ayaan ku ridi doonaa.

9) Ma arki kartaa daboolka dhalada subagga lawska? Qaabkee bay aheyd?[ilmo ayaa dhahay goobaabin]

10) Waxaan ku dhex arkaa baaquligaaga shan buskud. Meeqo ayaad ka tagi doontaa markaad cunto hal?[ilmaha ayaa ku jawaabay “saddex”]

11) Runtii waa qabow bannaanka. Aan fiirino heerkulka si aan u ogaano haddii aan u baahanahay jaakada jiilaalka ee culus. Qabowga waa 32 darajo. Haddii heer-kulku ka hooseeyo qabowga barafka ah(barafowga), waxaan u baahanahay jaakadaha jiilaalka. Aan isla hubino. Waa 41 darajo. 41 miyuu ka sarreeyaa 32? Haa! Aynu xirano jaakadayada fudud.

12) Waxa haray afar buskud iyo shan qof oo raba xoogaa buskud ah.



**HAWLQABAD 1.6**

**Math & Numeracy Lab, University of Minnesota**

© 2025

## HAGAAJINTA HAB-DHAQANKA

# XALKA SU'AALAHA: QAYBTA 1AAD

## XEERARKA LOOGU TALAGALAY XIRFADLAYAASHA TAAGEERA QOYSKA

1) **Toogan**: Waxay soo gudbinaysaa caqli ah "Waan samayn karaa", kor u qaadaa qiimaha dadaalka, wuxuuna tusaaleeya xallinta dhibaatada.Toogan: Waxay soo gudbinaysaa farxad ku saabsan tirinta.


2) **Tooban**: Waxay soo gudbinaysaa hab-dhaqan ama dabeecad ah "xisaabtu aad bay u adag tahay" oo ka tagta fursadda lagu xallinayo dhibaatada.

In loo beddelo bayaan toogan: Aan samayno Makaroni(Baasto) iyo Farmaajo(burcad). Tilmaanta cuntadani waxay leedahay waxaan u baahanahay ¼ koob oo subag ah, laakiin subagga waxaa lagu qiyaasaa qaado. Ma hubo inta qaaddo ee ku jirta ¼ koob. laakiin waxaan isticmaali karnaa waraaqda duubka subagga si aan u ogaano. Aynu tirinno....1,2,3,4....waxaa ku jira 4 qaado oo ¼ koob ah.

3) **Toogan**: Waxay soo gudbinaysaa kobcinta maskaxda iyo dareen sharafeed. Waxay la wadaagtaa fikradda ah in caqabadaha lagaga gudbi karo haddii aan dhammaystirno.

4) **Toogan**: Waxay soo gudbinaysaa fikradda ah in loo baahan yahay xallinta mashaakilaadka si ay qaabka ugu habboonaato.

5) **Tooban**: Waxay soo jeedinaysaa marka xallalka xisaabta aan si sahal ah loo aqoonsanin inaysan u qalmin dadaalka



**HAWLQABAD 1.6**

**Math & Numeracy Lab, University of Minnesota**

© 2025

# XALKA SU'AALAHA: QAYBTA 2AAD

## XEERARKA LOOGU TALAGALAY XIRFADLAYAASHA TAAGEERA QOYSKA

7) **Dhex-dhexaad ah**: waalidka ayaa tan ka dhigi kara dabeecab xisaabeed oo toogan haddii ay horay ugu socdaan siday ilmaha ula xallin lahaayeen mushkiladda, sida ku darista, "waxaan ku ogaan karnaa innagoo si taxadar leh u tirinayna" ama ka dhigo dabeecad xisaabeed oo taban haddii ay xoogga saaraan tirada xad dhaafka ah ee xannibaya inay aad u badan yihiin oo ilmahoodu aanay tirin karin.

8) **Tooban**: Waxay soo gudbinaysaa hab-dhaqan ama dabeecad ah "xisaabtu aad bay u adag tahay" oo ka tagta fursadda lagu xallinayo dhibaatada.

9) **Dhex-dhexaad**: waalidka waxa uu aqoonsaday fursadda xisaabeed ee uu kaga hadlo qaababka, laakiin kum darin astaamo toogan ama taban.

Hal tusaale oo lagu daro dabeecadda xisaabta ee toogan waa ammaanta ilmaha iyo fidinta fikradaha xisaabta, sida in la dhao, "Haa! Taasi waa sax-horka sare ee daboolku waa goobaabin. Dhaladu waxay leedahay magac gaar ah: waxaa loo yaqaannaa dhululubo maxaa yeelay waxay leedahay goobaabin xagga kor iyo hoos, laakiin sidoo kale waxay leedahay dhinacyo"[waxay tilmaamaysaa geeska ama cidhifka si ay u muujiso dhinaca]

10) **Tusaale ahaan gudbinta dabeecadda xisaabta taban**: "Haye, waa nooc sida goobaabin oo kale ah, laakiin waa dhululubo. Taasi waa qaab adag in la ogaado; waxay u badan tahay inay kugu adag tahay adiga.



**HAWLQABAD 1.6**

Math & Numeracy Lab,
University of Minnesota

© 2025

## HAGAAJINTA HAB-DHAQANKA

# XALKA SU'AALAHA: QAYBTA 3AAD

## XEERARKA LOOGU TALAGALAY XIRFADLAYAASHA TAAGEERA QOYSKA

10) **Dhex-dhexaad**: Waalidku waxa uu aqoonsaday fursadda xisaabeed ee uu kaga hadlo kala-goynta laakiin kama uu faa'iidaysan fursadda uu ku qaabeeyo xallinta mushkiladda oo uu muujiyo hab-dhaqan toogan. Waxay u gudbin karaan dabeecad xisaabeed oo toogan iyagoo leh, "Saddex waa wax ka yar shan. Shaqo wanaagsan in aad oogaatay inay ka yaraan doonto. Aan wada tirino si aan u aragno waxa soo haray. [Waxay la tirisaa ilmaha; ilmahi wuxuu yiri, "afar"] Taasi waa sax! Afar! Waad samaysay! Waxaad ogaatay inay afar kuu hartay."

11) **Togan**: Waxay soo gudbinaysaa in xisaabtu faa'iido leedahay si loo ogaado xaaladaha maalin joogtada ah.

12) **Dhex-dhexaad**: waalidka waxa uu aqoonsaday fursad xisaabeed oo uu kaga hadlo kala-qaybinta laakiin kuma darin sifooyin toogan ama taban. Waalidku waxa uu u isticmaali karaa fursadan si uu u sii wado oo uu u dhiso dabeecad xisaabeed oo toogan.



**HAWLQABAD 1.6**

Math & Numeracy Lab,
University of Minnesota

© 2025

HAWLAHA LOOGU TALAGALAY XIRFADLAYAASHA TAAGEERADA QOYSKA:

# Sahaminta Xisaabta Hore

"Habka Xisaabinta" waxaa loo sameeyay Xirfadlayaasha Taageerada Qoyska si ay ula adeegsadaan qoysaska ay u adeegaan. Dhammaan waxqabadyada waxaa lagu heli karaa lacag la'aan, gudaha machadka Xisaabta Horumarinta Ilmaha iyo website-ka Tirooyinka, si gaar ah loogu isticmaalo qoysaska iyo waalidiinta. Qalabkan ayaa laga yaabaa maaha in dib loo soo saaro ama loo qaybiyo mid kasta oo loogu talagalay dadaalka faa'iidada iyada oo aan oggolaansho cad laga helin horumarinta hogaanka, Drs. Wackerle-Hollman iyo Mazzocco.

**Cutub 1: Sida Fikirka iyo Dabeecadaha ay u Saameyn karaan Xisaabta Hore**

Hawlqabad 1.1 Qof Walba Wuu Guulaysan
Hawlqabad 1.2 Aragtii Cusub
Hawlqabad 1.3 Habka Xisaabinta
Hawlqabad 1.4 Ka Barashada Khaladaadaha Xisaabta
Hawlqabad 1.5 Fikrado, Su'aalo, iyo Wada-Hadal
Hawlqabad 1.6 Hagaajinta Hab-Dhaqanka
Hawlqabad 1.7 Waxaan Nahay Dhamman Dad Xisaabed

**Cutub 2: Xisaabtu waa tirooyinka iyo in ka badan: Sahaminta Mawduucyada Xisaabta Hore**

Hawlqabad 2.1 Kaleidoscope Xisaabta
Hawlqabad 2.2 Mawduucyada Xisaabta Hore
Hawlqabad 2.3 Sawirka Xisaabta
Hawlqabad 2.4 Kor U Qaadis!
Hawlqabad 2.5 Barashada Socod Baradka

**Cutub 3: Helitaanka Xisaabta ee Nolosha Maalinlaha ah**

Hawlqabad 3.1 Sheekooyinka Guusha Xisaabta Hore
Hawlqabad 3.2 Cuntooyinka Fudud Ee Xisaabta
Hawlqabad 3.3 Raadinta Xisaabta Qarsoon
Hawlqabad 3.4 Xisaab Ku Muuji Fikirkaaga
Hawlqabad 3.5 Ficilka Xisaab Maalmeedka
Hawlqabad 3.6 Jadwal Maalinle ah oo Fudud

Hawlahan waxaa soo saaray Shaybaarka Xisaabta iyo Tirooyinka, oo uu hogaaminayso Michèle Mazzocco, Machadka Horumarinta Carruurta (ICD), iyada oo la shaqaynaysa waa Alisha Wackerle-Hollman, Agaasimaha IGDI Shaybaarka, Waaxda Cilmi-nafsiga Waxbarashada, labadaba Jaamacadda Minnesota. Wax ku darsaday waxaa ka mid ah ardayda dhaktornimo ICD Sarah E. Pan, MA, iyo Jasmine R. Ernst. Shaqadan waxaa taageeray Heising-Simons Foundation DREME Network Awards 2018-0670 iyo 2020-1777. Waxaan u mahadcelineynaa Shaybaadhka Xisaabta iyo Tirooyinka ee gacan ka geystay shaqadan, Xirfadlayaasha taageerada qoyska kuwaas oo bixiyay jawaab celin ama nagu soo dhaweeyay (iyo hawlaheenna) fasalladooda, iyo la-taliyeyaasha jaalkayaga bulshada kuwaas oo bixiyay fikrado ku saabsan xulashada luqadda oo keenay sawirro si ay shaqadani uga dhigto mid macno leh beelaha Laatiinka iyo Soomaalida.

UNIVERSITY OF MINNESOTA MATH & NUMERACY LAB

© 2025

IGDILAB